Faallo Qoto-dheer : SDP.F20.05

SOMALI DIALOGUE PLATFORM

14 Sebteembar 2022

# Xulashooyinka lagu xallin karo maqaamka Muqdisho

Somali Public Agenda

# Dulmar

Maqaamka Muqdisho oo aan weli la xalin ayaa kamid ah arrimaha ugu muhiimsan heshiiska siyaasadda Soomaaliya. Lagasoo bilaabo sanadkii 2012, Soomaaliya waxay horumar ka samaysay in la caddeeyo nooca federaalka iyadoo la dhisay Dowlad-goboleedyo sidoo kalena la sameeyay dadaallo – inkastoo guulo kooban laga gaaray – si loo caddeeyo xiriirka ka dhexeeya heerarka kala duwan ee dowladda. Caddeynta maqaamka Muqdisho, sikastaba ha hoqotee, oo ahayd caasimadda Soomaaliya ilaa 1960-kii, waxa uu noqday mid la isku khilaafay.

Magaaladu waxay Soomaaliya dhexdeeda ku leedahay muhiimad siyaasadeed, dhaqaale iyo bulsho. Waxay martigelisaa dad lagu qiyaasay 2.6 milyan oo qof, iyadoo ku dhawaad lixdii qof ee Soomaali ah mid kamid ahi uu ku nool yahay magaalada. Muqdisho, oo sidoo kale ah xarunta dowladda federaalka, waa xudunta dhaqaalaha Soomaaliya – dakhliga kasoo xarooday iyo deeqaha ay dowladda federaalka heshay sanadka 2019 ayaa ahaa USD 338.3 milyan, marka loo eego USD 135 milyan oo ay soo xareeyeen guud ahaan dowlad-goboleedyada (kuwaasoo canshuur ka uruuriya gobollada ay maamulaan.) Dakhliga badan ee Muqdisho waxa uu ka tarjumayaa shaqada sii kobceysa ee dekedda magaalada iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay, iyo sidoo kale xaqiiqda ah in Muqdisho, oo ah caasimadda Soomaaliya, ay tahay albaabka ay Soomaaliya kasoo gasho maalgelinta iyo taageerada caalamka.

Ku uruurinta awoodda iyo dhaqaalaha ee Muqdisho ayaa keentay in loo tartamo maamulka magaalada Muqdisho iyo dhaqaalaheeda oo qeyb muhiim ah ka ahaa isbedellada siyaasadda iyo, inta badan, xasilooni darada dalka. Tan iyo markii xornimada la qaatay, kooxaha gacanta ku haya magaalada waxay caadiyan awood u yeesheen inay saameyn weyn ku yeeshaan dhaqaalaha dalka. Welwelka laga qabay in Muqdisho ay udub dhexaad u ahayd siyaasadda Soomaaliya ayaa qeyb muhiim ah ka ahayd dagaalladii sokeeye ee horseeday burburka dowladnimo ee sanadkii 1991, waxaana ilaa maanta qaar kamid ah kooxaha ku nool gobollada ka fog Muqdisho ay ka feejigan yihiin in kooxda gacanta ku haysa caasimadda ay awood aad u badan yeelato.

Taariikhdan hardanka ah ee ku xeeran maqaamka Muqdisho ee nidaamka siyaasadeed ayaa ka dhigay dadaallada loo galay sidii loo cadeyn lahaa kala qeybinta masuuliyadaha kala duwan ee heerarka dowladda mid aad u adag. Rabshadaha iyo barakaca soo laalaabanayay tan iyo bilowgii dagaalka sokeeye ayaa sidoo kale lala xiriiriyaa tartanka kooxaha sheeganaya inay u dhasheen wakiillana u yihiin magaalada. Tani keliya ma horjoogsanayso rajada maamul loo dhan yahay ee Muqdisho laga dhiso, balse waxay ka hor imaaneysaa fahamka ah in caasimadda astaan midnimo u tahay qaranka.

Sidaas darteed, maqaamka Muqdisho – marka la eego sida loo maamulayo iyo sida loogu metelayo hay'adaha qaranka – waa in la xaliyaa si loo horumariyo heshiiska guud ee siyaasadda Soomaaliya iyo hiigsiga dalka ee colaadaha kadib. Hadda, qodobka 9-aad ee dastuurka kumeelgaarka ah ee la ansixiyey sannadkii 2012, ayaa dhigaya in Muqdisho ay caasimadda Soomaaliya tahay, iyadoo uu qodobkaas farayo in maqaamka Muqdisho lagu xallin doono dib-u-eegista dastuurka iyo in baarlamaanka uu caddeyn doono maqaamkeeda. Tan iyo sanadkii 2012, sikastaba ha ahaatee, wadahadalkii lagama maarmaanka ahaa ee lagu gaari lahaa is-afgarad ku saabsan arrintan ma dhicin. Magaalada Muqdisho waxaa hadda si rasmi ah u maamula dowladda federaalka – Guddoomiyaha Gobolka Banaadir (ahna Duqa Muqdisho) iyo dhammaan guddoomiyeyaasha degmooyinka waxaa magacaaba dowladda federaalka, oo sidoo kale maamusha dakhliga kasoo xarooda magaalada. Arrintaan ayaa dhalisay walaac ku aadan in Maamulka Gobolka Banaadir uusan metelin shacabkiisa, gaar ahaan maadaama aysan jirin nidaam doorasho deegaan iyo isla xisaabtan, waxaana dhaqaalaha kasoo xarooda magaalada ugu horreyn lagu maalgeliyaa dowladda

federaalka halkii loo isticmaali lahaa adeegyada bulshada, taasoo ugasii dareysa taariikhda Muqdisho ee loollanka la xiriira dhaqaalaha.

Iyadoo la sameynayo dadaal lagu doonayo in lagusoo cusbooneysiiyo wada-hadallada la xiriira arrintan, Somali Dialogue Platform iyo Somali Public Agenda ayaa soo saaray faalladan qotada-dheer oo qeexeysa fursadaha lagu xallin karo maqaamka Muqdisho. Faallada waxaa la diyaariyey iyadoo lala tashanayo khubaro farsamo oo kala duwan iyo siyaasiyiin kaasoo qeyb galay madasha 'F20' ee uu qabtay Platform-ka, oo si wadajir ah loogu sahminayay xalalka arrimaha la isku khilaafsan yahay ee heshiiska siyaasadda Soomaaliya. Faallada waxa uu ujeedkeedu yahay in ay soo bandhigto falanqeyn ay isticmaali karaan siyaasiyiinta Soomaaliya iyo guud ahaan shacabka.

# Qaab-dhismeedka falanqeynta

Iyadoo laga duulayo shaqada ay qabteen Wasaaradda Arrimaha Dastuurka ee Dowladda Federaalka, Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, iyo Guddiga La-socodka Baarlamaanka, qeybta soo socota waxay qeexaysaa saddex xulasho oo lagu xallin karo maqaamka Muqdisho:

1. Degmo ay Dowladda Federaalka Maamusho
2. Dowlad-goboleed
3. Caasimad ku dhex taalla Dowlad-goboleed

Xulasho kasta, waxaa la is weydiinayaa shan su'aalood oo muhiim ah oo u baahan in ay si taxadar leh uga fiirsadaan madaxda, siyaasiyiinta iyo shacabka Soomaaliyeed si ay heshiis uga gaaraan maqaamka Muqdisho.

- **Muqdisho sidee loo maamulayaa?** Maqaamka Muqdisho waa in lagu xalliyaa heerarka dowladeed ee leh awoodda, cidda masuulka ah waxa ay qabaneyso, iyo sida loo dooranayo cidda maamuleysa.
- **Sidee loo maamulayaa dakhliga Muqdisho?** Maqaamka Muqdisho waa inuu xalliyaa sida dakhliga badan ee kasoo xarooda magaalada – gaar ahaan dekeddeeda – loo uruurinayo, loo maamulayo loona kharash gareeynayo.
- **Sidee Muqdisho loogu metelayaa hay'adaha qaranka?** Maqaamka Muqdisho ayaa qaabeyn doona sida magaalada loogu metelayo hay'adaha qaranka, sida Golaha Amniga Qaranka, iyo sidoo kale metelaadda ay ku leedahay Aqalka Sare.[1]
- **Sidee ayuu maqaamka Muqdisho saameyn ugu yeelanayaa heshiiska guud ee nidaamka federaalka?** Maqaamka Muqdisho ayaa saameyn ku yeelan doona isku dheeli tirnaanta awoodeed ee ka dhex jirta dowladda maadaama ay saameyn ku yeelan karto heerka awoodeed iyo dhaqaale oo ay dowladda federaalka heli karto, iyo sidoo kale heerka ay Muqdisho kaga jiri doonto hannaanka federaalka haddii ay noqoto maamul madax banaan.
- **Sidee ayuu maqaamka magaaladu u saameynayaa doorkeeda caasimad ahaan?** Maqaamka Muqdisho waxa uu saameyn ku yeelan doonaa door-

1 Dastuurka Kumeelgaarka ah ma caddeynayo qaabka loo qeybinayo kuraasta Aqalka Sare. Qodobka 72-aad wuxuu dhigayaa saddex kursi in la siiyo mid kasta oo kamid ah 18-kii gobo lee jiray kahor 1991, halka uu sidoo kale sheegayo in dhammaan dowlad-goboleedyada ay helaan metelaad siman. Maadaama ay adag tahay in labadaas shardi la buuxiyo, ayaa saami qeybsiga kuraasta Aqalka Sare lagu sameeyay heshiisyo siyaasadeed, iyadoo aysan jirin wax kuraas ah oo loo qoondeeyay Banaadir. Sidaas darteed ma cadda sida fursadaha kala duwan ee maqaamka Muqdisho ay u saameynayaan metelaadda Aqalka Sare, inkastoo laga yaabo haddii uu Banaadir noqdo dowlad-goboleed in uu xaq u yeelan doono kuraas Aqalka Sare ah.

keeda astaanta u ah dhismaha qaranka, gaar ahaan iyadoo uu maqaamka qaabeyn doono heerka loo arko in ay tahay magaalo astaan u ah qiyamka qaran ee la wadaago.

Iyadoo su'aalahan loo adeegsanayo, falanqeynta soo socotaa waxay sidoo kale iftiimineysaa saameynta muhiimka ah ee xulasho kasta, iyo sidoo kale faa'iidooyinka iyo faa'ido darrada suurtagalka ah.

# Xulashooyinka

## Xulashada 1-aad: Degmo ay Dowladda Federaalka Maamusho

Xulashadan, Muqdisho waxaa loo aqoonsanayaa degmo si toos ah u hoos tagta dowladda federaalka. Tani waxay ka dhigan tahay in Muqdisho aysan sameysan doonin dowlad-goboleed u gaar ah ama aysan kamid noqon doonin dowlad-goboleed kale. Dowladda federaalka ayaa masuul ka noqon doonta dhismaha dowlad hoose oo ay yeelato Muqdisho oo maamuli doonta magaalada, hoggaankeedana si toos ah loosoo dooran doono.

| Su’aalaha ugu muhiimsan | Saameynta xulashadan |
|---|---|
| **Muqdisho sidee loo maamulayaa?** | Gole lasoo doortay, oo kormeeraya dowladda hoose ee Muqdisho, inkastoo ay u badan tahay in dowladda federaalka ay door weyn ku yeelan karto howlaha muhiimka ah – sida amniga gudaha magaalada – marka la barbardhigo dowlad-goboleedyada kale. |
| **Sidee loo maareeynayaa dakhliga?** | Iyadoo ku xiran qaabka loo nidaaminayo, dowladda federaalka waxay u badan tahay in ay si weyn u saameyn doonto dakhli uruurinta iyo kharash bixinta Muqdisho marka la barbardhigo dowlad-goboleedyada. |
| **Sidee Muqdisho loogu metelayaa hay’adaha qaranka?** | Maqaamka Muqdisho la mid ma noqon doono dowlad-goboleedyada, metelaaddeeda hay’adaha qarankana waa in la caddeeyaa.<br><br>Magaaladu waxay u badan tahay inay yeelan doonto metelaad ka hooseysa ama yar ee Aqalka Sare marka la barbardhigo dowlad-goboleedyada. |
| **Sidee ayuu maqaamka Muqdisho saameyn ugu yeelanayaa heshiiska guud ee nidaamka federaalka?** | Awooda ay dowladda federaalka ku dhex leedahay nidaamka federaalka ayay u badan tahay in uu kordho maadaama ay gacanta ku heyso dhaqaalaha Muqdisho.<br><br>Maadaama uu yahay xulashada u dhaw sida ay hadda wax yihiin, saameyn weyn kuma yeelan doonto isku-dheelitirka awoodda dowlad-goboleedyada. |
| **Sidee ayuu maqaamka magaaladu u saameynayaa doorkeeda caasimad ahaan?** | Muqdisho waxay ahaan doontaa caasimad, taasoo xoojineysa fikradda ah in magaalada aysan kooxna sheegan, sida dowlad-goboleedyada oo kale. |

### Faa'iidooyinka:

- Wuxuu u dhow yahay xaaladda hadda taagan waxaana loo arki karaa xulashada ugu toosan. Muhiimad ahaan, ma kicin doonto dood cusub oo ku saabsan awood qeybsiga dowlad-goboleedyada kala duwan.
- Waxay kordhin doontaa dhaqaalaha ay heli karto dowladda federaalka maadaama ay hormuud ka tahay agendaha dowlad-dhisidda Soomaaliya.
- Muqdisho waxay yeelanaysaa maqaam gaar ah oo ah caasimadda qaranka, taasoo awood u siinaysa inay astaan u noqoto qiyamka guud oo ay wadaagaan Soomaalida.

### Faa'ido darrada:

- Dad badan oo deggan Muqdisho ayaan ka qeyb qaadan doonin maamulka magaaladooda marka loo eego muwaadiniinta ku nool dowlad-goboleedy-ada, iyo metelaad yar oo ay shacabka Muqdisho ku nool ku yeelan doonaan hay'adaha qaranka.
- Awoodda dowladda federaalka oo kororto iyadoo loo marayo xulashadan waxa laga yaabaa in ay dhaliso cabsida xukun marooqsiqa oo ay dow-lad-goboleedyada ka qabaan dowladda federaalka, taasoo kordhin karta xiisadaha u dhexeeya labada heer ee dowladeed.
- Muwaadiniinta Muqdisho waxay u badan tahay inay metelaad yar ku yeelan doonaan Aqalka Sare marka la barbardhigo muwaadiniinta dow-lad-goboleedyada.

## Xulashada 2-aad: Dowlad-goboleed

Xulashadan, Muqdisho waxay noqon doontaa dowlad-goboleed. Inta badan, magaalada waxaa loo maamuli doonaa si lamid ah dowlad-goboleedyada kale, halka xiriirka ay la leedahay dowladda federaalka la qeexi doono. Sikastaba ha ahaatee, xeerar gaar ah ayaa loo baahan doonaa si loo qeexo maamulka dhulka iyo xafiisyada dowladda federaalka ee ku yaalla Muqdisho.

| Su'aalaha ugu muhiimsan | Saameynta xulashadan |
|---|---|
| **Muqdisho sidee loo maamulayaa?** | Dowlad-goboleed ahaan, oo leh awoodo iyo waajibaadyo lamid ah dowlad-goboleedyada kale, inkastoo xeerar gaar ah la sameyn doono maadaama dowladda federaalka ay ku shaqeyso Muqdisho. |
| **Sidee loo maareeynayaa dakhliga?** | Dakhliga waxaa loo maareyn doonaa habraacyo waafaqsan heshiiska federaalka – waxay u badan tahay inay Muqdisho hesho madax-bannaani weyn ee xagga uruurinta iyo isticmaalka dakhliga ah. |
| **Sidee Muqdisho loogu metelayaa hay'adaha qaranka?** | Muqdisho waxay yeelan doontaa miisaan lamid ah dowlad-goboleedyada kale ee hay'adaha qaranka.<br><br>Magaaladu waxay u badan tahay inay xaq u yeelan doonto metelaad weyn oo Aqalka Sare ah, ugu yaraan metelaad lamid ah dowlad-goboleedyada kale. |
| **Sidee ayuu maqaamka Muqdisho saameyn ugu yeelanayaa heshiiska guud ee nidaamka federaalka?** | Waxay abuuri doontaa dowlad-goboleed kale, kaasoo u baahan doona in lagu daro heshiiska guud ee federaalka.<br><br>Waxay u badan tahay inay si weyn u dhimi doonto awoodda dowladda federaalka ku dhex leedahay hannaanka federaalka. |
| **Sidee ayuu maqaamka magaaladu u saameynayaa doorkeeda caasimad ahaan?** | Muqdisho waxay yeelan doontaa maqaam lamid ah dowlad-goboleedyada kale, oo loo arko inay u badan yihiin qabiilo gaar ah, taasoo saameyn ku yeelanaysa doorka caasimadda oo ah astaanta midnimada qaranka. |

### Faa'iidooyinka:

- Waxay siineysaa is-maamul ballaaran muwaadiniinta Muqdisho si lamid ah dowlad-goboleedyada kale, oo ay ku jirto in si weyn loo maareeyo dakhliga canshuuraha ee magaalada.
- Waxay u badan tahay inay kordhiso metelaadda ay ka helayaan muwaad-iniinta Muqdisho hay'adaha qaranka iyadoo la caddeeynayo metelaadda magaalada ee hay'adaha qaranka iyo kordhinta metelaadda ay magaalada ku leedahay Aqalka Sare.
- Hoos-u-dhigista awoodda dowladda federaalka ee habkan waxa ay mee-sha ka saaraysaa welwelka kooxaha ka jira Soomaaliya oo ka walaacsan

awood xad dhaaf ah oo ay dowladda federaalka ku yeelan karto hannaanka federaalka.

### Faa'ido darrada:

- Waxaa laga yaabaa in ay abuurto khilaaf u dhexeeya heerarka kala duwan ee dowladda ee ka wada dhisan magaalada (dowladda federaalka, dowlad-goboleedka, dowladda hoose), taasoo saameynaysa arrimaha muhiimka ah, sida dakhli-ururinta, amniga iyo maamulka dhulalka dowladda.

- Waxaa laga yaabaa in khilaaf hor leh uu ka dhaliyo heshiiska federaalka ee Soomaaliya, iyadoo kooxo gaar ahi ay ku doodi karaan in dowlad-goboleedka Muqdisho uu maamulkiisa u badan yahay qabiilka Hawiye, – oo sidoo kale ku badan Galmudug iyo Hirshabeele – kaasoo ka dhigaya Hawiye beesha koowaad ee u badan saddexda dowlad-goboleed. Kooxaha qaar ayaa laga yaabaa inay ku doodaan in ay iyagana sameystaan dowlad-goboleedyo kale.

- Madax-bannaani weyn oo ay yeelato Muqdisho marka loo eego dakhli-ururinta waxa ay yareyn kartaa baaxadda wareejinta maaliyadeed ee dowladda federaalka ee loo wareejinayo dowlad-goboleed kale si la isugu dheelitiro sinnaan la'aanta u dhexeysa dowlad-goboleedyada.

- Haddii Muqdisho loo arko in ay tahay dowlad-goboleed beel u badan tahay, waxa ay wiiqi doontaa doorka caasimadda ee calaamadda midnimada Soomaalida, taasoo khatar gelin karta maamul loo dhan yahay oo magaalada laga dhiso. Mid kamid ah hababka lagu xallin karo arrinkan waa in loo wareejiyo caasimadda magaalo kale. Xal kale ayaa ah in Soomaaliya aysan yeelanin caasimad rasmi ah, taa beddelkeedana ay ku baahiso hay'adaha dowladda federaalka dalka oo dhan si loo horumariyo midnimada qaranka.

## Xulashada 3-aad: Caasimad ku dhex taalla Dowlad-goboleed

Xulashadan, Muqdisho waxay noqon doontaa dowlad-goboleed ku dhex yaalla qeyb kamid ah magaalada oo loo asteeyay inay noqoto caasimadda dalka – tusaale ahaan, qeybta magaalada kamid ah ee martigelinaya xafiisyada dowladda federaalka. Sharci qeexaya maqaamka Muqdisho ayaa lagu qeexaya dhulka noqon doona caasimadda, sida loo maamuli doono, iyo xiriirka ay dowladda federaalka la yeelan doonto dowlad-goboleedka ka dhisan Muqdisho.

| Su'aalaha ugu muhiimsan | Saameynta xulashadan |
|---|---|
| **Muqdisho sidee loo maamulayaa?** | Labo qeybood – qeyb noqoneysa dowlad-goboleed, oo leh awood iyo masuuliyad lamid ah dowlad-goboleedyada kale, iyo qeyb noqoneysa magaalo madax gaar ah oo leh maamul u gaar ah. |
| **Sidee loo maareeynayaa dakhliga?** | Dakhliga dowlad-goboleedka waxa loo maareyn doonaa si waafaqsan heshiiska guud ee federaalka – inkastoo habab gaar ah loo sameyn karo degmooyinka noqnaya caasimadda. |
| **Sidee Muqdisho loogu metelayaa hay'adaha qaranka?** | Muqdisho oo ah dowlad-goboleed waxay yeelan doontaa miisaan lamid ah dowlad-goboleedyada kale ee dalka.<br><br>Magaaladu waxay u badan tahay in ay yeelan doonto metelaad ballaaran oo Aqalka Sare ah, oo lamid ah dowlad-goboleedyada kale, inkastoo xal ka duwan laga yaabo in loo baahdo in loo helo sida loo maamulayo degmooyinka noqonaya caasimadda. |
| **Sidee ayuu maqaamka Muqdisho saameyn ugu yeelanayaa heshiiska guud ee nidaamka federaalka?** | Waxay abuuri doontaa dowlad-goboleed kale oo qeyb ka noqon doona hannaanka federaalka.<br><br>Waxay u badan tahay in ay yareyn doonto awoodda dowladda federaalka ee hannaanka federaalka, inkastoo aysan awoodda dowladda federaalka u wiiqmeynin si lamid ah xulashada 2-aad. |
| **Sidee ayuu maqaamka magaaladu u saameynayaa doorkeeda caasimad ahaan?** | Inkastoo sameynta dowlad-goboleed cusub ay xoojin karto aragtida ah in ay u badan yihiin beelo gaar ah, in qeyb kamid ah magaalada ay caasimad sii ahaaneyso waxay xoojin kartaa astaanteeda in ay tahay caasimadda Soomaaliya. |

### Faa'iidooyinka:

- Waxay sahlaysa in Muqdisho ay sii ahaato magaalo-madax loo arki karo inay tahay astaan qaran oo la wadaago, iyadoo siinaysa metelaad iyo madax-bannaani ballaaran inta badan dadweynaha ku nool Muqdisho.

- Waxa laga yaabaa in si meel dhexaad ah loo xalliyo doorka Muqdisho ee hannaanka guud ee federaalka, sida dejinta nidaam gaar ah ee dakhli-wadaag ah ee dheelli-tiraya madax-bannaanida dowlad-goboleedka Muqdisho iyo muhiimadda dowladda federaalka oo heleysa dhaqaale ku filan oo ay ku fuliso agendaha heer qaran una maareyso sinnaan la'aanta ka dhex jirta dowlad-goboleedyada.

### Faa'ido darrada:

- Ku heshiinta iyo kala xadeynta degmooyinka Muqdisho ee noqonaya dowlad-goboleed ama magaalo-madaxda waxay noqon kartaa mid adag, maadaama nidaamka noocan ah inta badan loo isticmaalo magaalooyinka ku dhex yaalla gobol weyn. Iyadoo inta badan Xafiisyada dowladda federaalka ay ku yaallaan degmada Warta Nabadda, haddii sidoo kale afarta degmo ee deriska la ah lagu daro (Boondheere, Howlwadaag, Xamarweyne iyo Waaberi), tani waxay Muqdisho ka abuureysaa labo awoodood oo kala duwan, taasoo caqabad ku noqon karta maamulka magaalada, abuureysana jahawareer ku saabsan sida labadan maamul loogu metelayo hay'adaha heer qaran. Degmooyinka qaar waxa kale oo laga yaabaa in ay doorbidayaan inay ku biiraan dowlad-goboleedka ama caasimadda, iyadoo aan loo eegin habka ugu faa'iidada badan degmada, taasoo abuuri karta khilaafyo kale.

## Habab kale oo la tixgelin karo

Iyadoo saddexda xulasho ee kore ay yihiin noocyada ugu waaweyn ee lasoo jeediyey si loo caddeeyo maqaamka Muqdisho, dhowr habab oo kale ayay sidoo kale soo jeediyeen ka qeyb galayaasha kulamada F20.

### In lagu heshiiyo metelaadda Muqdisho kahor inta aan la cadeyn maqaamka magaalada

Caqabadda ugu weyn marka ay timaado qeexidda maqaamka Muqdisho ayaa ah sida ay u saameyn karto metelaadda Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Wax ka qabashada arrintan kahor inta aan la qeexin maqaamka magaalada waxay fududeyn kartaa arrinta maqaamka. Nidaamkan oo kale wuxuu qaadan karaa dhowr sano, iyadoo ay jiraan fursado dhowr ah, sida in lagu heshiiyo wax-ka-beddelka dastuurka ee kuraasta Aqalka Sare ee gobolka Banaadir, ama in laga wada xaajoodo in tiro cayiman oo kuraasta Aqalka Sare ah oo ay hadda heystaan dowlad-goboleedyada la siiyo Banaadir. Haddii taas lagu heshiiyo, waxay suurtagelin kartaa in doorashooyin qaran ay dhacaan iyadoo la yareynayo dareenka ku xeeran doodda maqaamka Muqdisho.

### Isku-darka Muqdisho, Balcad iyo Afgooye si loo sameeyo dowlad-goboleed cusub

Xulasho kale waxay noqon kartaa in degmooyinka Balcad iyo Afgooye (oo ka kala tirsan gobollada Shabeellada Dhexe iyo Shabeellada Hoose) lagu daro qeybo kamid ah Muqdisho si loo sameeyo dowlad-goboleed cusub, iyadoo degmooyinka harsan loo asteynayo in ay noqdaan caasimadda dalka oo ay toos u maamusho dowladda federaalka. Xulashadan waxay lamid tahay xulashada 3-aad ee xulashooyinka kore, farqiga keliya ee u dhexeeya ayaa ah in qeybo ka mid ah gobollada deriska la ah lagu daro gobolka Banaadir.

### In lagu heshiiyo xudduudaha Muqdisho kahor inta aan la cadeyn maqaamka magaalada

Maqaamka Muqdisho wuxuu u baahan yahay sharci uu soo saaro baarlamaanka federaalka. Sharcigan kahor, baarlamaanku wuxuu ka shaqeyn karaa inuu qeexo xuduudaha dhulka iyadoo loo marayo Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka, kaasoo shaqeynayay dhowr sano.

# Talooyin tixgelin mudan

Heshiis in laga gaaro maqaamka Muqdisho ayaa muhiim ah. Wadahadal siyaasadeed oo loo dhan yahay iyo dood dadweyne oo ku saabsan xulashooyinka ayaa lama huraan u ah taageerada siyaasadeed iyo is-afgaradka lagama maarmaanka u ah geeddi-socod dib-u-eegis dastuur wax-ku-ool ah oo ay hoggaamiyaan Wasaaradda Arrimaha Dastuurka, Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, Guddiga Lasocodka iyo, ugu dambeyntii, baarlamaanka. Sidoo kale, muwaadiniinta Muqdisho waa in ay hormuud ka noqdaan doodaha ku saabsan mustaqbalkooda iyo maqaamka magaalada Muqdisho. Sidoo kale, dadaal kasta oo lagu xallinayo maqaamka Muqdisho waa inuu qeyb ka noqdaa geeddi-socod ballaaran oo looga golleeyahay in lagu ballaariyo maamulka dimuqraadiga ah ee Soomaaliya iyo xallinta arrimaha awood-qeybsiga iyo kheyraadka, gaar ahaan kuwa la xiriira hannaanka federaalka sida federaaleynta maaliyadda iyo doorashooyinka.

Maqaamka ugu dambeeya ee Muqdisho waxa uu saameyn doonaa sidoo kalena qaabeyn doona wada-hadalladan ballaaran, taasoo la macno ah in doodaha is khuseeya loo baahan yahay in la isku xiro. Waxaa kaloo jira arrimo kale oo u baahan in si wadajir ah loo xalliyo, sida in la caddeeyo xuduudaha u dhexeeya Banaadir/Muqdisho iyo dowlad-Goboleedyada Koonfur Galbeed iyo Hirshabeelle. Faallada Somali Dialogue Platform iyo Somali Public Agenda ee 'Hannaanka Wada-hadalka' waxa ay soo jeedineysaa talooyin ku saabsan sida loo maareyn karo hannaan ballaaran oo lagu xalliyo arrimahan muddo xileedka dowladda federaalka cusub, faalladaasoo la rajeynayo in ay fikrado ku biiriso fagaarayaasha kala duwan ee looga hadlayo arrimaha muhiimka ah, oo ay ku jirto arrinta maqaamka Muqdisho.

Iyadoo aan loo eegeynin habka, hal qodob oo muhiim ah oo ay tahay in la tixgeliyo ayaa ah haddii ay jirto fursad lagu qabto doorashooyinka madaxda degmooyinka magaalada iyo Maamulka Gobolka Banaadir. Doorashooyin dowladaha hoose keliya ma kordhinayaan ka qeybgalka iyo isla xisaabtanka dowladaha hoose, waxay sidoo kale keenaysaa madaxda loo doortay magaaladu in ay ka doodaan maqaamka Muqdisho oo ay u badan tahay inay ku metelaan aragtida dadka deegaanka wada-hadalladan. Dhanka kale, inkastoo tani ay si weyn kor ugu qaadayso sharcinimada go'aan kasta oo kama dambays ah, caqabadaha ku gadaaman qabashada doorashooyinka Soomaaliya waxay ka dhigan tahay in habkani uu keliya keenayo in dib loo dhigo bilowga wada-hadallada dhabta ah ee arrinta maqaamka Muqdisho.

## Xuquuq

Faalladan qotada-dheer waxaa si wadajir ah usoo saaray Somali Dialogue Platform iyo Somali Public Agenda.

Somali Dialogue Platform waa barnaamij Soomaalida ka taageera sidii loo gaari lahaa is-afgarad ku saabsan arrimaha la isku haysto ee siyaasadeed waxaana fuliya Machadka Rift Valley. Somali Dialogue Platform waxaa maalgeliya Foreign, Commonwealth and Development Office (FCDO) ee Boqortooyada Ingiriiska, Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Denmark, iyo Hay'adda Mareykanka u Qaabilsan Horumarinta Caalamiga (USAID). Aragtiyada faallada kama turjumayaan siyaasadaha rasmiga ah ee Dowlada UK, Dowlada Denmark ama Dowlada Mareykanka. Platform-ku wuxuu leeyahay madaxbannaanida tifaftirka warbixinnaddiisa oo dhan.

Somali Public Agenda (SPA) waa hay 'ad aan macaash-doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan. Somali Public Agenda waxa ay wadashaqeyn la leedahay Somali Dialogue Platform.

MachadkaRift Valley wuxuu ka shaqeeyaa bariga iyo bartamaha Afrika si uu usoo saaro aqoon maxalli ah oo loo adeegsan karo horumarinta arrimaha bulshada, siyaasadda iyo dhaqaalaha.

Xuquuqda daabacaadda © Machadka Rift Valley 2022.

Warbixintan waxaa la daabacay iyadoo la adeegsanayo Creative Commons Attribution-NonCommercial-NoDerivatives License (CC BY-NC- ND 4.0).